“Ku Soo Dhawow Kenya”

Xadgudubyada Booliisku u Gyastaan Qaxootiga Soomaalida

Guudmar

> “Waxaa naloola dhaqmay sidii xayawaan baabuur saaran.”
> —Sidaas waxa yiri qof qaxooti ah oo lagu xiray saldhg booliis oo ku yaalla Garissa, Gobolka Waqooyi Bari Kenya.

Sumcaddii Kenya ay ku heshay martigelinta qaxootiga Soomaalida waxay isku beddelaysaa miro qaraar. Labaatan sano kadib markii ay ka soo qaxeen khilaaf arxandarro ah, Kenya waxay magangelyo siisaa 325,000 qaxooti Soomaali ah oo diiwaangashan —iyo weliba tiro intaas u dhiganta oo aan diiwaangashanyn. Qofna shaki ma gelinayo culayska ay leedahay. Hase yeeshee fikradda sii xoogoobaysa ee ay dawladdu ku sharaysanayso qaxootiga — kuwaasoo boqolkiiba 80 ayyihin haween iyo carruur – una sharaysanayaan sidii oo ay halis ku yihiin amniga qaranka waxay qaxootigii ka dhigtay inay ka mid noqdaan dhibbanayaasha ugu nugul ee ay ka faa’iidaystaan booliiska Kenya ee musuqmaasuqa iyo xadgudubka ku kaca.

Meel u dhow xadka Kenya la leedahay Soomaaiya ee rasmi ahaanta xidhan, booliiska oo kaashanaya dillaaliin waxay awood u heleen inay dhexda u joogsadaan intii ay doonaan ee u suurtogasha ee ah qaxootiga lagu qiyaasay 10,000 ee Soomaalida ah ee magangelyodoon ahaanta bil kasta xadka uga soo gudba. Iyagoo aan kala saarin haweenka, carruurta iyo raga, booliisku waxay inta badsan isticmaalaan gacan ka hadal, xarig aan sharci ahayn oo lagu xidho goob dacdarraa iyo dadkuna ka batay, waxayna adeegsadaan hanjabaado ah in la masaafurinayo si ay uga qaataan lacago baad ah. Qaar ka tirsan saraakiisha booliiska waxay xadka agteeda ku kufsadaan haweenka. Tobankii usbuuc ee ugu horresay sannadka 2010, boqollaal, haddiiba aysan ahayn kumannaan magangelyodoonayaal Soomaali ah oo awoodi waayey inay lacagaha baadda bixiyaan ayaa si sharcidarro ah dib loogu celiyey Soomaaliya.

Hanjabadada baahsan ee ay booliisku dhexda ugu joogsadaan qaxootiga iyo xadgudubyadu waxay badi magangleydoonayaasha ku qasabtay inay ku safraan wadiiqooyin yaryar oo ka

fog waddooyinka waaweyn ee isku xira xuduudda iyo xeryaha qaxootiga, halkaasoo dambiilayaasha (“oo ay magangelyodoonayaashu ku sifeeyaan inay yihiin rag aan dirays xirnayn”) ayaa iyaguna ka faa’iidaysta iyagoo kufsada haweenka kana qaata lacagta yar ee ay haystaan.

Kala-badh dhammaan Soomaalida u soo qaxda` Kenya waxay iska diiwaangeliyaan xerada qaxootiga la dejiyo ee ugu weyn caalamka oo ka kooban saddex xero oo dadku ka bateen oo u dhow magaalada Dadaab kuna taalla waqooyi bari Kenya oo ay haatan ku jiraan ku dhowaad 300,000 qof. Badhka kale waxay tiigsadaan Nayroobi, caasimadda Kenya halkaasoo dad tiro yar ay u suurtogasho inay qaxootinnimo isku diiwaangeliyaan taasoo ay ugu wacan tahay kartida xaddidan ee dawladda iyo tan Hay’adda Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR). Xeryaha dhexdoodana, booliiska u xilsaaran ilaalinta qaxootiga ayaa mararka qaarkood xidha, weerara isla markaana lacago baad ah ka qaata. Booliisku waxay sidoo kale ku guuldarraysteen inay joojiyaan kiisaska xadgduubka galmada ee ka dhex dhacda qaxootiga dhexdooda taasoo horseedday inuu abuurmay dhaqan ah inaan lala xisaabtamin kuwa mas’uulka ka ah.

Kenya waxay haatan qaxootiga ku xayirtaa xeryaha taasoo aan sharci ahayn, una diidda xornimadii dhaqdhaqaaqa iyo inay doortaan halka ay degayaan taasina waxay ku xadgudbaysaa Cahdigii Qaxootiga 1951, inkastoo kumanaan ay iska diiwaangeliyeenNayroobi. Siyaasaddan waxay oggolaatay in booliisku ay qabtaan qaxootiga safraya iyagoon oggolaansho haysan (inkastoo mararka qaarkoodna la qabto iyagoo oggolaansho haysta), kana qaata lacago baad ah, xilliyada qaarna waxaa la geeyaa maxkamad ku taalla magaalada Garissa halkaasi oo lagu ganaaxo ama lagu xabbiso.

Keliya markii ay lacag siiyaan booliiska – taasoo dhacda markii dhexda loo istaago agagaarka xadka, ama marka ay ku xiran yihiin saldhigyada booliiska Liboi, Dadaab, iyo Garissa – ayey qaxootiga lacago isku soo furtaan si ay uga badbaadaan xadgudubka iyo cabsigelinta.

Qaabka nidaamsan isla markaana baahsan ee ay ku dhacaan ursiga lacagaha baadda ah iyo xadgudubyada kale ee la xiriira ee ay booliisku gaystaan waxay si toos ah uga dhasheen tallaabada ay Kenya ku goosatay xidhitaanka xadka ee saddex sano jirsatay iyo arrinta taas la xiriirta ee lagu xiray xaruntii qabashada qaxootiga ee ku taallay magaalada Kenya ee Liboi oo 15 kilomitir u jirta xadka isla markaana 80 kilomitir u jirta xeryaha qaxootiga. Xaruntaasi qabashadu waxay markii hore goob nabdoon u ahayd inta badan dadka Soomaalida ah ee ka soo qaxaya dalkooda ee soo galaya Kenya halkaasi oo ay ka soo daadgurayn jirtay hay’adda UNHCR si ay u keento xeryaha. Xaruntaasi la’aanteed, booliisku waxay xuduudda

ka dhigteen shabag ay ku kalluumaystaan iyagoo dhisaya, waxa uu qof u dhashy Kenya oo ka mid ah shaqaalaha la shaqeeya qaxootiga Soomaalida ku sifeeyey “makiinad weyn oo lacagta samaysa.” Hadllada sii kordhaya ee siyaasadeed ee ka dhanka ah Soomaalida ee mas’uuliyuiinta Kenya jeediyaam, gaar ahaan kadib markii kooxda Soomaaliya ee islaamiga ah ay ku hanjabtay inay weerarayso caasimadda Nayroobi, waxay gacan ka gaysteen inay cudurdaar u noqdaan dhaqanka xadgudubka leh ee booliisku kula kacaan Soomaalida.

Booliiska qabanaya qaxootiga Soomaalida waxay u sheegaan inay sharcidarro ku joogaan Kenya waxaana lagu soo oogaa dambi iyadoo la adeegsanayo Xeerka Socdaalka Kenya oo mamnuuca in Kenya la soo galo dokumenti ama fiiso la’aan. Laakiin xeerkaasi ma qabanayo dadka magangleyodoonka ah sida uu dhigayo Xeerka Qaxootiga Kenya kaasoo odhanaya in qofku haysto 30 maalmood oo ka bilaabata marka ay soo galaan inay isku diiwaangeliyaan qaxooti ahaan iyagoo iska diiwaangelinaya xafiiska ugu dhow ee Hay’adda Qaxootiga Kenya. Soomaalida dhinaca dhulka maraysa ee ka imanaysa Soomaaliya, meesha ugu dhow ee qaxootiga ee ay iska diiwaangelin karaan waa xeryaha Dadaab.

Xeerarka xuquuqda aadanaha iyo kuwa qaxootiga ee caalamiga ah waxay mamnuucayaan in la hor istaago, ama qasab lagu celiyo qaxootiga meel lagu ciqaabi karo ama lagu xadgudbi karo, qaaradda Afrikana waxay taasi saamaynaysaa dadka rayidka ah ee ay soo waajihi karaan qalalaase guud. Kenya xaq ayey u leedahay inay shuruucda marsiiso qof kasta oo aan muwaadin ahayn oo dalkeeda ku sugan sidaasi darteedna waxay xaq u leeyihiin inay dad gaar ah ka horistaagaan inay soo galaan ama ku nagaadaan Kenya – oo ay ku jiraan kuwa loo arko inay halis ku yihiin amnigeeda qaranka sida kooxda islaamyiinta Soomaaliya ee al-Shabaab. Laakiin waa inaysan xuduudda ka xiran dadka magangleydoonka ah isla markaana aysan masaafurin kuwa magangleyada doonaya iyo qaxootiga iyadoo dib loogu celinayo Soomaaliya.

Xaqiiqada ah in booliiska ku sugan xuduudda ay oggolaadaan in magangelyodoonaha dhexda loo istaago si ay lacago baad ah u bixiyaan si ay uga soo gudbaan kontoroollada ayna u soo gaaraan xeryaha qaxootiga waxay muujinaysaa in macaash shaqsi ahaaneed – oo aan shaqo ku lahayn dano amni qaran – ay tahay sababta dhab ta ah ee booliisku u qabtaan, ugu hanjabaan ayna sida been-abuurka ah ugu dacweeyaan inay sharcidarro ku joogaan dalka.

Inkastoo qaxootigu ay yihiin dhibbanayaal xadgdubka booliiska degaannada xuduudda iyo xeryaha qaxootiga, waxay haddana dhinaca kale ku tiirsan yihiin booliiska inay ka ilaaliyaan dambiyada ay gaysanayana shaqsiyaadka gaarka ah, sida xadgdubyada galmada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha taasoo muddo ka soo taagnayd xeryaha iyo degaanka ku

xeeran. Hase yeeshee haweenka iyo gabdhaha la kulmay xadgudubyadaasi galmada waxay sharraxeen in gebi ahaanba booliisku jawaab ku filan aysan ka bixinin xadgudubyada galmada ee lagula kaco.

Dawladdu waxay ku adkaysanaysaa in booliiska lagu amro inay sameeyaan baadhitaanno hufan oo waqtigooda leh. Hase yeeshee dadka ka badbaaday waxaya sheegeen in cabashadooda inta badan la iska dhegotiro halkii laga baari lahaa, mararka qaarkoodna dib ayaa loo dhigaa iyadoo booliisku dalbadaan inay keenaan caddaymo ka dhan ah kuwa falka gaystay, ama kiiska waa la laalaa iyadoo aan wax sharraxaad ah laga bixin. Dadka ka badbaaday waxay sheegeen in mararka dhifka ah ee ay booliiska qabtaan kuwa weerarka gaystay ay sii daayaan saacado ama maalmo kadib iyagoo aan wax taallaabo ah ka qaadin inay baadhaan ama dacwad ku soo oogaan xadgudbaha. Haween badan waxay sheegeen in kuwa weerarka u gaystay ay ku guulaystaan inay laaluushaan booliiska si ay uga hortagaan in baadhitaan la sameeyo ama si loo sii daayo haddii booliisku qabto.

Waajibaadka calamiga ah iyo kan goboleed ee xuquuqda aadanaha ee saaran Kenya ayaa mas'uuliyiinta ku waajibinaya inay ka hortagaan, baadhaan ayna dacwad ku soo oogaan, ayna ciqaabaan kuwa ka dambeeya xadgudubka lagula kaco haweenka dhaamntood – oo ay ku jiraan haweenka qaxootiga ah – ee ku sugan Kenya. Horumar muhiim ah ayaa laga sameeyey jawaabta booliisku ka bixiyo xadgudubka galmada muddadaii labaatanka sano ku dhowayd ee ay jireen xeryahan. Xadgudubyada galmada iyo kuwa ka dhanka sinsiga waxaa dacwadooda lagu qaadi karaa maxkamado guurguura oo la geeyo magaalada Dadaab bil kasta iyo saldhigga booliiska Dagahaley oo leh xafiis haweenka qaabilsan oo kiisaskan maamula. Laba xafiis oo kale ayaa qorshaysan in laga furo xeryaha Ifo iyo Hagadera. Hase yeeshee dawladdu ma hawlgelin tirada ciidanka booliiska ee loo baahnaa, tababarkii iyo kormeerayaashaasi intaba. Sidaasi darteedna, caddaalad ay helaan dadka la kulmay xadgudubka galmada weli way reeban tahay waxaana qaalib noqotay la xisaabtan la'aanta kuwa xadgudubka gaysta.

Muddo lix maalmood ah ayaa bishii Maarso 2010 ay xeryaha Dadaab hay'adda Human Rights Watch ku waraysatay 102 qof oo qaxooti ah oo laga waraystay xadgudubyada booliiska iyo xadgudubyada galmada ee ka dhaca xeryaha iyo nawaaxigooda. Kala-badh dadka la waraystay waxay ka hadleen xadgudubyo ay gaysteen booliisku oo ay ku jiraan isticmaalid xoog xad dhaaf ah oo keenay dhimasho iyo inay haweenku ilmaha soo tuuraan, kufsi, shaabuugayn, garaacis iyo harraati. Shan iyo toban ka mid ah dadka la waraystay waxay sheegeen in booliisku qabtay lana xidhay – oo lala xidhay ilaa 220 qof oo kale – wax yar kadib markii ay soo galeen Kenya. Siddeed ka mid ah waxay sheegeen in booliisku masaafuriyey iyaga iyo 152 qof oo kale dibna loogu celiyey Soomaaliya kadib markii ay iska

bixin waayeen inay booliiska lacag siiyaan. Ka sokow muddada xaddidan ee Human Rights Watch ay cilmi-baarista ka samaysay xeryaha, tiradani waxay muujinaysaa in xadgudubyada lagu diiwangeliyey warbixintan ay yihin kuwo nidaamsan oo baahsan.

UNHCR waxay ku guuldarraysatay inay dejiso nidaam waxtar leh oo lagula socdo laguna ururiyo macluumaadka ku saabsan xadgudubyada lagu diiwaangeliyey warbixintan. Hay'addan qaxootiga ee Qaramada Midoobay waxay sheegtay inay jiraan dhowr waxyaabood oo saameeyey kartidii ay ku fulin lahayd waajibaadka ilaalinta ah ee saaran: waxaana ka mid ah walaaca dhinaca amniga ee xayira shaqadooda xeryaha iyo in tasiilaadkooda ay qarqiyaan wax ka qabashada baahida xagga bani'aadminnimo ee xeryaha oo ay la degeen buux dhaaf iyo maalgelin la'aan.

Isagoo ka jawabayey warqad ay u dirtay Human Rights Watch mas'uuliyiinta Kenya warqaddaasi oo ay ku qoran yihiin guudmarka nuxurka warbixintan, ayaa Wasiiru Dawlaha Maamulka Gobolka iyo Amniga Gudaha Kenya uu ku wargeliyey Human Rights Watch bishii May 5, 2010, in "fal aan sharci ahayn oo uu ku kacay sarkaal ka tirsan booliiska aanu ka turjumayn siyaasadda dawladda." Waxaa kaloo uu sheegay inuu codsaday In koox baadhitaan ay daraasad ku sameeyaan macluumaadka ku qoran warbixinta Human Rights Watch. Kooxdaasi waxay diyaarin doonaan warbixin ay dawladdu "ka baaraan degi doonto…ayna tijaabin doonto [marka la eego] isku hallaynteeda:. Intaasi waxaa dheer, Wasiirka oo sheegay in "haddii sarkaal ka tirsan booliiska lagu helo inuu ka qaybqaatay xadgudubyada in tallaabo sharciga waafaqsan laga qaadi doono." Kooxdu waxay ka kooban tahay sheekh Muslim ah oo Soomaali asalkiisu yahay, laba xubnood oo haweenka matalaya (qof dumar ah oo ka socota degaanka Dadaab iyo qof dumar ah oo ka socota Ururka Haweenka Qaranka), xubin wakiil ka ah dhalinyarada Dadaab iyo wakiil matalaya Dalladda Qaxootiga Kenya. Human Rights Watch waxay soo dhowaynaysaa go'aanka Wasiirka uu ku magacaaby koox baadhitaan; laakiin tani waa tallaabadii u horraysay keliya.

Si dhaqso loogu soo afjaro xadgudubyada baahay ee warbixintan ku qoran, mas'uuliyiinta Kenya, UNHCR, iyo dawladaha deeqda bixiya waa inay qaadaan dhowr tallaabo oo degdeg ah.

Mas'uuliyiinta Kenya waa inay si degdeg ah ugu amraan booliiska inay joojiyaan qoor-qabataynta nidaamsan, xadhigga, xadgudubka, masaafurinta iyo lacagaha baadda ee ay ka qaadanayaan dadka magangelyodoonka ah ee ka soo gudbaya xadka kana imanaya Soomaaliya iyo in lagu amro booliiska inay magangelyodoonayaasha u oggolaadaan inay si nabd ah ku soo gaadhaan xeryaha qaxootiga Dadaab. Mas'uuliyiintu waa inay dedejiyaan qorshahooda ay ku furayaan xarun cusub oo lagu baadho qaxootiga oo ku taalla Liboi si loo

xaqiijiyo in si nidaamsan loo diiwaanageliyo magangelydoonayaasha cusub isla markaana loogu oggolaado qaxootiga diiwaangashan ee ku sugan xeryaha inay si xor ah ugu dhex socdaali karaan Kenya. Sidoo kale mas'uuliyiintu waa inay dejiyaan hab adag oo ay kula socdaan kuna kormeeraan maamulka booliiska ee xadgudubyada galmada iyo kuwa ku salaysan sinjiga ee ka dhaca xeryaha iyagoo abuuraya unugga booliiska qaranka oo shaqadoodu tahay la dagaalanka xadgudubyada galmada ka dhanka ah qaxootiga iyagoo iskaashi la samaynaya Guddiga Qaranka ee Horumarinta iyo Haweenka. Intaas waxa dheer in booliisku ay ka shaqeeyaan inay booliisku helaan karti ku filan oo ay ku jirto in la hawlgeliyo laguna daro saraakiil booliis oo dheddig ah si ay si waxtar leh uga hortagaan ugana jawaabaan xadgudubyada galmada.

UNHCR waa inay si dhaqso ah u meelmarisaa nidaam cusub oo lagula soconayo oo xeryaha ka dhaqangala kaasoo diiwaangeliya macluumaad ku saabsan xadgudubyada ku xusan warbixintan iyo in macluumaadkasi loo istcimaalo u doodista xuquuqda dhibbanayaasha loogana hortago xadgudubyo kale. UNHCR waa inay si joogto ah u booqataa saldhigyada booliiska ee Liboi, Dadaab, iyo Garissa si ay u hubiyaan in booliisku ay sharcidarro ku xireen dad magangelydoonayaal ah ayna u doodaa sii dayntooda. UNHCR sidoo kale waa inay iskaashi kala samaysaa booliiska sidii loo hagaajin lahaa jawaabta booliisku ka bixiyaan xadgudubka galmada, iskaashigaasi oo ay ku jirto in xogta ay hayso UNHCR loo isticmaalo horumarinta abuuritaanka roondo booliis ah oo kormeer ka sameeya xeryaha oo ujeedkooduna yahay ka hortagista xadgudubka galmada.

Waddamada`deeqa bixiya waa in xadgduubyada ku cad warbixintan ay la soo qaadaan mas'uuliyiinta Kenya ayna ugu baaqaan in ficilladaas si degdeg ah loo joojiyo. Waa inay ugu baaqaan mas'uuliyiinta Kenya inay ka shaqeeyaan sidii dhammaan dadka magangleyodoonka ah ay u soo geli lahaayeen Kenya iyo inay dedejiyaan dib u furista xarunta baadhitaanka qaxootiga ee Liboi. Waddamada deeqda bixiya sidoo kale waa inay ka shaqeeyaan inay ku cadaadiyaan mas'uuliyiinta Kenya iyo UNHCR xaqiijinta in booliiska cusub ee la dhigay xeryaha si gaar ah loogu xilsaaro hagaajinta hawsha ka hortagista iyo ka jawaabista xadgudubyada galmada ee ka dhaca xeryaha. Ugu dambayn, waddamada deeqda bixiya waa inay ku dhiirrigeliyaan UNHCR inay nidaam la socod ka samayso saldhigyada booliiska ee Liboi, Dadaab, iyo Garissa ayna maalgeliso sidii ay UNHCR u abuuri lahayd nidaamkaasi ilaalinta iyo la socodka.

Talooyin Buuxa

Ku socota Dawladda Kenya

Qodobka ku saabsan Gacanka ka hadalka Booliiska iyo Lacagaha Baadda ah ee Laga Qaado Magangelyodoonka iyo Qaxootiga

- Waa in si degdeg ah loogu amraa Saraalka ugu Sarreeya Booliiska Garissa iyo Saraakiisha u Xilsaaran xeryaha Liboi, iyo xeryaha iyo magaalada Dadaab iyo saldhigyada booliiska Garissa inay soo afjaraan xadgdubyada gacanka ka hadalka ee booliisku kula kacaan dadka magangelyodoonka ah iyo qaxootiga.
- Waa in la baadhaa saraakiisha mas'uulka ka ah kufsiga, weerarka iyo kuwa lacagaha baadda ah ka qaata magangelydoonka iyo qaxootiga degananada u dhow xuduudda, iyo saldhigyada booliiska ee Liboi iyo Garissa, iyo xeryaha Dadaab maxkamadna lala tigsado saraakiisha lagu helo inay dambiyadaasi galeen.
- Waa in la xaqiijiyaa in booliiska Kenya ay joojiyaan lacagaha baadda ah ee ay ka qaadanayaan magangelydoonayaasha iyo qaxootiga iyagoo taasi kaga beddelanaya inay u gudbaan xeryaha qaxootiga ama magaalada Garissa waana in anshaxa la marsiiyaa maxkamadna lala tiigsadaa saraakiisha lagu helo inay ku lug leeyihiin qaadashada baadda.
- Waa in la kordhiyaa tababarka booliiska Kenya ee ku sugan Gobolka Waqooyi Bari Kenya wacyina laga siiyaa isticmaalka xoogga xad-dhaaf ah, musuqmaasuqa, iyo xuquuqda qaxootiga iyo magangelydoonayaasha marka la eego Xeerka Qaxootiga 2006.

Qodobka ku saabsanQabashada iyo Xadhigga aan Sharciga Waafaqsanayn ee Booliisku kula kacaan Maganglelyodoonayaasha

- Waa in amar lagu siiyaa booliiska ku sugan degaannada xuduudda inay degdeg u joojiyaan qabashada iyo xadhigga magangelydoonayaasha markii ay xadka ka soo gudbayaan.
- Waa in degdeg loo sii daayaa dadka magangleydoonayaasha ah ee ku xidhan saldhigyada booliiska Liboi, Dadaab, iyo Garissa loona oggolaadaa inay u gudbaan xeryaha si ay qaxooti ahaan iskugu diiwaangeliyaan.
- Waa in baadhitaan lagu sameeyaa saraakiisha sare ee mas'uulka ka ah in si aan sharciga waafaqsanayn ay u qabtaan una xira magangelyodonayaasha, waana in anshaxa la marsiiyaa ama dacwad lagu soo oogaa kuwa ku lugta leh dambiyadaasi oo kale.

- Waa in tallaabooyin degdeg ah laga qaadaa sidii loo wanaajin lahaa xaaladda saldhigyada booliiska dadka lagu xidho ee magaalooyinka Liboi, Dadaab, iyo Garissa, oo ay ka mid tahay in la yareeyo dadka lagu xidhayo qolalka loo dhisay inay qaadaan maxaabiis intaasi ka tiro yar, waana in dadka xidhan loo oggolaadaa inay tagaan musqulaha ka baxsan qolka, lana siiyaa cunto iyo biyo ku filan.

Qodobka ku Saabsan Dib u celinta Booliiska iyo Milatarigu ku Sameeyaan Magangelydoonayaasha

- Waa in si degdeg ah loo joojiyaa dhammaan dib u celinta dadka magangelyodoonayaasha ah.
- Waa in la baadhaa dhammaan shilalka dhacay ee la xiriiray celinta ee ay saraakiisha ciidanka booliiska Kenya ama askartuba lagu ogyahay inay si qasab ah ku celiyeen qaxooti ama magangelydoonayaal dib loogu celiyey Soomaaliya lagana qadaa tallaabada ku habboon ee anshaxa.

Qodobka ku Saabsan Xidhitaanka Xadka

- Waa in si rasmi ah loo shaaciyaa in xadku u furan yahay dadka magangelyodoonka ah iyadoo la raacayo waajibaadka Kenya ka saaran sharciga caalamiga ah iyo kan Kenya, in loo oggolaado Soomaalida iyo dadka kale ee magangelydoonka inay ka soo gudbaan qayb kasta oo ka mid ah xadka Soomaaliya, oo ay ku jiraan dhammaan baraha rasmiga ah ee laga soo gudbo ee xuduudda ku yaalla.
- Waa in la dedejiyaa furitaanka xarun baadhitaanka qaxootiga oo laga furo magaalada Liboi si loo sugo diiwaangelin habsami leh ee dhammaan magangelyodoonayaasha ka imanaya Soomaaliya ee ka soo gudbaya barta kontoroolka HarHar ee u dhexeeysa Dobley iyo Liboi ama meel u dhowba; waana in loo oggolaadaa UNHCR inay gacan ka siiyaan Waaxda Amuuraha Qaxootiga Kenya baadhitaanka iyo diiwaangelinta dadka cusub.
- Waa in loo oggolaadaa UNHCR iyo shirkadaha gaarka ah ee gaadiidka inayka soo daadgureeyaan dadka magangelyodoonka ah ee soo gaadha barta xadka ku taalla ee HarHar ee soo gaadhaya Liboi ayna soo gaadhaan xeryaha si looga hortago xadgudub ay booliisku ku sameeyaan magangelyodoonka markii ay usoo socdaan xeryaha qaxootiga.

Qodobka ku Saabsan Dhaqdhaqaaqa Xorta ah

- Iyadoo la raacayo waajibaadka caalamiga ah iyo kan dastuuriga ah ee saaran Kenya, iyo maqnaanshaha halis gaar ah oo la xiriirta dhinaca amniga qaranka oo la

shaaciyey oo khusaysa dhaqdhaqaaqa qof gaar ah, waa in la xaqiijiyaa in dhammaan dadka loo aqoonsaday qaxootinnimada oo ay ku jiraan kuwa ka diiwaangashan Dadaab, ay helaan xorriyad buuxda oo ay ku dhaqdhaqaaqaan gudaha Kenya lagana shaqeeyaa in qof qaxooti ah oo ku sugan Kenya aan loo qabanin eedo odhanaya “wuxu ku joogaa oggolaansho la’aan” markii qofku joogo meel ka baxsan xeryaha Dadaab.

- Waaxda Amuuraha Qaxootiga waa in loo kordhiyaa tasiilaadka loo baahan yahay si looga shaqeeyo in dhammaan qaxootiga diiwaangashan ee ku sugan Dadaab la siiyo “Shahaadada Qaxootinnimada”—Kaararka Aqoonsiga—booliiskana lagu amro inay xurmeeyaan xuquuqda dhaqdhaqaaq ee qofkii kaarkaas haysta; inta kaararkaasi laga soo saarayana waa in qaxootiga la siiyaa dokumenti kale oo dammaanqaadaya xuquuqdooda dhaqdhaqaaq.

Qodobka ku Saabsan Jawaabta Booliisku ka Bixiyaan Xadgdubyada Galmada ee Qaxootiga Xeryaha Dhexdooda ka Dhacda

- Waa in la gudagalaa qorshe si muuqata u kordhinaya tirada saraakiisha ku sugan saldhigga booliiska ee xerada Dadaab, gaar ahaa saraakiisha dheddiga ah, la yareeyo isbedbeddelka badan ee booliiska ka hawlgala xeryaha, iyo in la damaanad qaado inay markasta joogaan saraakiil khibrad u leh ka jawaabista xadgudubyada galmada iyo qalalaasaha ku salaysan sinjiga.
- Waa in la xaqiijiyaa in xubin booliis oo cusub la tabaraa laguna amraa inay si waxtar leh uga hortagaan ugana jawaabaan kiisaska la xiriira xadgudubka galmada iyo kuwa ku salaysan sinjiga, tababarkaasi oo ay ku jirto farsamada saynis ahaaneed ee ururinta caddaymaha markii fal-dambiyeed dhaco.
- Waa in la dejiyaa hannaan la socod oo adag laguna kormeero sida bopoliisku u maamulaan xadgudubyada galmada iyo kuwa sinjiga ee ka dhaca xeryaha iyadoo la abuurayo unug booliis ah oo la dagaalama xadgudubyada galmada ee lagula kaco qaxootiga, unuggaasina waa inay iskaashi la sameeyaan Guddiga Qaranka ee Sinjiga iyo Horumarinta.
- Waa in iskaashi lala sameeyaa UNHCR, Wasaaradda Adeegga Daawada, iyo Wasaaradda Caafimaadka Dadweynaha iyo Nadaafadda si loo xaqiijiyo hirgelinta Tilmaamaha Qaranka ee Maaraynta Xadgudubyada Galmada ee ka dhaca Kenya.
- Waa in, iyadoo iskaashi lala samaynayo UNHCR iyo hay’adaha iskaashiga la leh, si degdeg ah loo abuuraa xafiiska qaabilsan dumarka ee saldhiga booliiska xerada Ifo isla markaana la guda galaa sidii xafiiskaasi oo kale looga hirgelin lahaa xerada Hagadera.

- Waa in la naqshadeeyaa lana hirgeliyaa jadwald roondo oo ay booliisku kaga hawlagalaan xeryaha oo diiradda saara goobaha iyo xilliyada maalintii ee ay suurtogalka tahay in xadgudubyada galmadu dhacaan, sida lagu ogaaday falanqayntii lagu sameeyey shilalka dhacay.

Ku Socota Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay

Qodobka ku Saabsan Xadgudubyada Booliiska Kenya u Gaystaan Magangelyodoonka iyo Qaxootiga Soomaalida

- Waa la abuuraa hannaan la socod iyo ilaalin oo ka dhaqangala xeryaha hannankaasi oo UNHCR ka caawiya ururinta macluumaadka ku saabsan xadgudubyada la midka ah kuwa ku qoran warbixintan iyadoo:
    - la shaqaalaynayao shaqaale caalami ah iyo Kenyan ah oo si joogta ah uga hawlgala xeryaha loona xilsaaro ururinta iyo falanqaynta macluumaadkaas;
    - la shaqaalaynayo khubaro dhinaca sharciga oo leh tababarkii sharciga una shaqeeya sidii saraakiil ilaalin oo ka hawlgala xeryaha si ay u soo ururiyaan macluumaadka la xiriiria ilaalinta qaxootiga oo laga ururiyo qaxootiga iyo hay'adaha aan dawliga ahayn ee caalamiga ah, NGOs, ee ka shaqeeya xeryaha; iyadoo la yaraynayo ku tiirsanaanta lagu tiirsan yahay hoggaamiyayaasha qaxootiga inay macluumaadkaasi bixiyaan.
- Waa in warbixinta lagu soo ururiyo nidaamka kor ku xusan in lagala hadlo Sarkaalka Booliiska ugu Sarreeya ee Gobolka Waqooyi Bari ee ku sugan Garissa iyo Taliyaha Booliiska Nayroobi sidii xadgudubyada loo joojin lahaa.
- Waa in si joogto ah loo booqdaa saldhigyada booliiska ee ku yaalla xeryaha si loola socdo la dhaqanka qaxootiga halkaasi ku xiran; iyadoo laga duulayo xadgudubyada socda ee lagula kaco qaxootiga ku xidhan saldhigyada booliiska ee ku yaalla xeryaha Dadaab, waa in UNHCR dib u eegtaa wadashaqaynta ay la leedahay booliiska Dadaab si looga shaqeeyo in qaxootiga laga ilaaliyo xadgudubyadaasi oo kale.
- Waa in la diiwaangeliyaa eedaha ay jeedinayaan qaxootiga iyo magangelyodoonayaasha iyo qaxootiga lagalana hadlaa eedaha xadgududubyada raadka ku leh madaxda saldhigyada booliiska iyo Sarkaalka u Sarreeya Booliiska Gobolka Waqooyi Bari iyo Taliyaha Booliiska.
- Waa in si rasmi ah loo cambaareeyaa masaafurinta qaxootiga markasta oo la ogaado inay dhacday.

- Waa in xadgududubyada ay booliiska Kenya u gaystaan dadka qaxootiga ah iyo magangelyodoonka laga sheegaa shriweynaha Guddiga Maamula UNHCR oo sannadkan 2010 lagu qabanayo Geneva.

Qodobka ku Saabsan Qabqabashada iyo Xadhigga aan Kala-sooca Lahayn ee Booliiska Kenya u Gaystaan Magangelyodoonayaasha ku Sugan Saldhigyada Booliiska Liboi, Dadaab, iyo Garissa

- Iyadoo la raacayo awoodda ay leedahay UNHCR marka la eego Sharciyada Qaxootiga ee Kenya, waa in si joogto ah loo booqdaa saldhigyada booliiska Liboi, Dadaab, iyo Garissa si loo hubiyo in booliisku ay sharcidarro ku soo xidheen magangelyodoonayaasha; iyadoo meesha lagu ogaado in xariggaasi oo kale ka dhacayna, laga dalbanayo in si degdeg ah loo sii daayo kadibna arrintaasi lala soo qaado Sarkaalka u Sarreeya Booliiska Gobolka Waqooyi Bari iyo Taliyaha Booliiska.
- Waa in la kobciyaa lana fududeeyaa tababar joogto ah oo ay helaan xubnaha booliiska ee ka hawlgala saldhigyada booliiska kor ku xusan iyo kuwa xeryaha Dadaab iyadoo tababar laga siinayo xuquuqda dadka qaxootiga ah iyo kuwa magangelyodoonka ah ay ku hoos leeyihiin Xeerka Qaxootiga Kenya 2006, Cahdiga Qaxootiga 1951, iyo Cahdigii OAU 1969, xuquuqahaas oo ay ku jiraan inay xor ka yihiin in la xidho, si aan kala sooc lahayn, iyo in lagula kaco noocyada kala duwan ee qalalaase, xadgudub iyo qaadashada lacagaha baadda ah.

Qododbka ku Saabsan Xorriyadda Dhaqdhaqaaqa

- In loo dodo xuquuqda buuxda ee ay ku dhaqdhaqaaqi karaan qaxootiga, iyagoo maraya wixii xaddidaad ah ee sharciga waafqsan, lagana shaqeeyo fududaynta iyo ballaadhinta xorriyadda dhaqdhaqaaqa qaxooytiga ay kaga baxayaan ama ku soo galayaan xeryaha.

Qodobka ku Saabsan Xiritaanka Xadka

- Waa in Kenya lagu cadaadiyaa sidii dhaqso loogu furi lahaa xarunta baadhitaanka qaxootiga ee magaalada xuduudda Liboi iyo in dadka magangelyodoonka ah loo oggolaado inay six or ah u safraan iyagoo adeegsanaya gaadiidka caadiga ah oo kaga soo safraan xadka ilaa magaalada Liboi iyo inay gaadiidkaas kaga soo safraan Liboi ilaa xeryaha.

Qodobka ku Saabsan Jawaabta Booliiska ka Bixiyaan Xadgudubyada Galmada ee Qaxootiga Xeryaha Dhexdooda ka Dhaca

- Waa in la kobciyaa la socodka ay UNHCR la socoto jawaabaha ahy booliisku ka bixiyaan xadgududubyada galmada iyo kuwa sinjiga ku salaysan ee ka dhaca xeryaha iyadoo la diiwaangelinayo qabashada xadgudbaha iyo ururinta caddaymaha fal-damnbiyeedyada.
- Waa in la xaqiijiyaa nidaamka lagu ilaalinayo isla markaana haweenka ku sugan meelaha halista sare ka imanayso looga wareejin lahaa iyadoo la sugayo amniga haweenka iyo gabdhaha iyo in laga shaqeeyo sidii loogu heli lahaa xal waara.
- Waa in la sii wadaa booliska la gaynayo saldhigyada booliiska xeryaha qaxootiga si ay awood ugu helaan inay si waxtar leh uga hortagaan ugana jawaabaan kiisaska xadgudubka galmada iyo kuwa ku salaysan sinjiga.
- Waa in mas'uuliyiinta Kenya lagala shaqeeyaa abuuritaanka xafiisyo haweenka qaabilsan oo laga dhiso saldhigyada booliiska ee dhammaan saddexda xero qaxooti iyo abuuritaanka roondada booliiska ee xeryaha taasoo diiradda saarta ka hortagga xadgudubka galmada.

Ku Socota Guddiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dacwad Baaraha Khaaska ah ee Qaxootiga, Magangelyodoonka, Barakacayaasha, iyo Muhaajiriinta Afrika

- Waa in loogu baaqaa Kenya inay degdeg usoo afjarto xadgudubyada ku xusan warbixintan iyo in anshaxa la marsiiyo maxkamadna lala tiigsado xubinta ka tirsan booliiska ee lagu helo inay mas'uul ka yihiin.
- Waa in loogu baaqaa Kenya inay xurmayso waajibaadka caalamiga ah ee ka saaran in dhammaan dadka magangelyodoonka ah ay soo geli karaan xuduuddeeda si ay magangelyo u codsadaan.
- Waa in loogu baaqaa Kenya inay dedejiyaan qorshaha lagu furayo xarunta baadhitaanka qaxootiga Liboi si looga shaqeeyo nidaam u diiwaangelinta magangelyodoonka ka soo gudbaya barta HarHar ee xadka una dhaxaysa Dobley iyo Liboi ama meel u dhow.
- Waa in loogu baaqaa Kenya inay qaxootiga u dammaanad qaaddo xorriyad dhaqdhaqaaq oo aan xaddidnayn oo ay Kenya ku dhex helaan.
- Waa in loogu baaqaa Kenya inay ka hortagto, baadho, maxkamadayso, isla markaana ciqaabto kuwa ka dambeeya gacan ka hadalka lagula kaco haweenka iyo gabdhaha qaxootiga ee ku sugan xeryaha Dadaab.

- Waa in la codsadaa in la booqdo xeryaha isla markaana warbixino rasmi ah laga soo saaraa xadgudubyada soo waajaha magangelyodoonayaasha iyo qaxootiga u safraya kana diiwaangashan xeryaha.

Ku Socota Dawladaha Bixiya Deeqda iyo Dibudejinta ee Taageerada Siiya UNHCR iyo Kenya

- Waa inaad xadgudubyada ku xusan warbixintan kala hadashaan mas'uuliyiinta Kenya aadna ugu baaqdaan in ficilladan la joojiyo.
- Waa in kaalmada la siiyo Kenya tixgelinteeda lagu daraa warbixinaha laga keeno xadgudubyada iyo ku xadgudubka Kenya ay ku xadgudbayso xeerarka caalamiga ah ee qaxootiga iyo kuwa xuquuqda aadanaha.
- Waa in loogu baaqaa mas'uuliyiinta Kenya inay ixtiraamaan waajibaadka caalamiga ah ee ka saaran in dhammaan dadka magangelyada doonaya ay soo geli karaan xuduudda Kenya si ay magangelyo u codsadaan.
- Waa inay ugu baaqaan mas'uuliyiinta Kenya inay dedejiyaan furitaanka xarunta baadhitaanka qaxootiga ee Liboi si looga shaqeeyo habsami u diiwaangelinta dadka magangelyada doonaya ee ka soo gudbaya barta xadka ee HarHar ama meelaha u dhow ee u dhexeeya Dobley iyo Liboi
- Waa in laga kaalmeeyaa mas'uuliyiinta Kenya iyo UNHCR in la tababaro booliiska cusub ee la gaynayo saldhigyada booliiska ee xeryaha laguna amraa booliiska inay si waxtar leh uga hortagaan ugana jawaabaan kiisaska xadgudubka galmada iyo xadgudubyada ku salaysan sinjiga.
- Waa in la xusaa ku xadguduubka Kenya ay ku xadgududubtay xeerarka caalamiga ah iyo kuwa xuquuqda aadanaha marka la iskugu yimaado Shirka Guud ee Guddiga Maamula UNHCR ee 2010 kana dhacaya Geneva.
- Waa in lagu dhiirrigeliyaa UNHCR inay si joogto ah u kormeerto saldhigyada booliiska ee Liboi, Dadaab, iyo Garissa.
- Waa in la maalgeliyaa hannaan la socod iyo ilaalin oo ay UNHCR hirgeliso kaasi oo waafaqsan talooyinka ku socda UNHCR ee kor ku xusan.
- Waa in loogu baaqaa mas'uuliyiinta iyo UNHCR inay ka shaqeeyaan sidii booliiska cusub ee xeryaha la geeyo si khaas ah loogu hawlgelin lahaa inay hagaajiyaan tallaabooyinka ka hortagga iyo jawaabaha booliisku ka bixinayaan xadgududubyada galmada ee ka dhaca xeryaha qaxootiga.